Somali

# Nolasha Iskuulka

Hagaha Qoyska Cusub

Hagahan waxaad ka heleysaa warbixinta guud ee ku saabsan iskuulada dowlada ee Nova Scotia.

Haddii aad qabto wax su'aallo ah, halkana aadan jawaabaha kahelin, fadlan lasoo xiriir iskuulka degaankaga, Xarunta Waxbarashada Deegaankaga (RCE) ama Conseil scolaire acadien ee gobolka (CSAP).

## Sanad Dugsiyeedka (Kalendar)

Sida caadada, fasalada iskuulada dowlada ee Nova waxa ay bilaawdaan Sebtembar waxa ayna sidoo kale joogsadaan dhamaadka bisha Juun. SchoolsPlus waxa uu sii socdaa inta lagu jiro samarka.

- Sanad dugsiyeedka fasalada hoose ilaa fasalka 9 aad waxaa loo kala qeybiyaad saddax teeram.
- Sanad dugsiyeedka fasalada 10 ilaa fasalka 12 aad waxaa loo kala qeybiyaad saddax teeram.
- Barnaamijka dugsiga hoose waxa uu ku shaqeya asagoo raacaya kalendarka iskuulka.
- Iskuulada waxa ay fasaxa nasiinada galaan bisha Disembar iyo Maarso.

Waxaad ka heleysa kalendarka iskuulka ilmahaaga ee bogga internetka deegaankaaga RCE ama CSAP. Kalendarka waxa uu ku siin doona taariikhda saxda ah ee marka sanad dugsiyeedka ilmahaagu bilaabanyo iyo markuu ku egyahay sidoo kale xiliyada fasaxa. Waxa uu sidoo kale ka heli doonta waqtiyada kale ee uu xiran yahay iskuulka ardaydaada.

Tusaale ahaan, marka iskuulada uu xiran "Horumarinta Xirfadle" iyo "Qiimeynta" maalmo, marka ay macalimiinta iskuulka ay ku jiraan tabbobaro xirfadle ama u diyaar garoowayaan diyaarinta kaararka warbixin.

## Badbaadada iskuulka

Waaxda Waxbarashada iyo Kobaca Caruurta Yaryar waxa ay la shaqeysaa RCEs, CSAP, shaqaallaha iskuulka, iyo saaxiibo kale oo badan si loo hubiyo in iskuulada Nova Scotia ay yihiin goobo ardaydu ay waxbarashada diirada ku saari karaan shaqaalluhuna amniga badbaado si ay shaqadooda u qabsadaan.

Si aad waxbadan uuga ogaato amniga iskuulada, booqo: https://www.ednet.ns.ca/school-safety.

## Maalmaha Cimilada Xun

Haddii ay cimiladu xun tahay, waxaa suurta gal ah in iskuulka ilmahaaga waqti danbe la furo, ama uu gabi ahaanba markaa xirnaado.

Waxaad ka ogaan kartaa xirnaanshaha iskuulka maalmaha cimilada xun adigoo

- dhageysanaya warka deegaanka ee raadiyaha ama telefishinka.
- hubi bogga internetka RCE/CSAP
- waxaad eegta baraha bulshada iskuulka
- waxaad hubisaa iimeylkaaga ama fariin qoraaledka kaaga timid iskuulka

Waqti hore weydii iskuulka sanadka, sida aad ku heli kartoo ogeysiiska otomatiga, sida farimaha ku saabsan xiritaanka iskuulka.

Eeg **"Buska Iskuulka"** qeybta hoose waxii warbixin ah ee ku saabsan helitaanka buska iskuulka marka ay cimiladu xun tahay.

## Iskuulka kahore iyo kadib

Hubi bogga internetka ee iskuulkaga si aad ogaato waqtiga iskuulka la furayo iyo waqtiga la xirayo.

Ardayda ayaa lagu ilaaliya deyrka iskuulka 20 daqiiqo kahor inta uusan iskuulka bilaaban subaxii, kadibna markuu beelka dhaco, 20 daqiiqo markuu maalinta soo dhamaado, kadib markuu gambaleelka dhaco. Waxaad hubsataa in ilmahaaga aanan kaligiis looga tagin deyrka iskuulka.

Waa adiga masuuliyadaada in aad hubsato in ilmahaagu helo xanaano waqtiga iskuulka hor iyo kadiba. Haddii aad u baahan tahay caawinaad xanaano ee ilmahaaga, weydiiso iskuulkaga.

Waxaa suurtagal ah in la heli karoo barnaamij iskuulka kahore iyo kadiba ah ee deegaankaga. Waxii warbixin dheraad ah, oo ay ku jirto liiska barnaamijyada deegankaaga, eegBarnaamijka iskuulka hor iyo kadib ee boggeena internetka.

## Fasaxa bareega maalinta

- **Bareega riseska:** Ardayda dugsi hose ilaa fasalka 6 ayaa leh bareeg subaxi barqada waxaan la dhahaa risees.
- **Qadada:** Dhamaan iskuulada waxa ay leeyihiin bareeg maalinta kala barkeeda.
- **Kormeerka:** Maalinta iskuulka jiro oo dhan ardayda waxaa dusha kala socdo shaqaallaha iskuulka inta ay ku jiraan xilliyada bareega fasallada (tusaale, riseeska, qadada) iyo marka ay ka baxayaan dhismaha iskuulka (tusaale, markee ukal gooshayaan fasallada).

# Baska iskuulka

Ilmahaagu waxuu u qalmi karaa bas raac bilaash ah U qalmidu waxa ay ku xiran tahay fogaanka iskuulka iyo fasalkiisa. Waxaad la xiriirta iskuulkaaga deegaanka waxii warbixin dheraad ah ee ku saabsan u qalmida iyo ka diwaan gelinta ilmahaaga baska iskuulka.

Waxaad ogataa halka ilmahaagu ka raaci doono baska, waxaana hubsataa in uu yimaado goobta waqtiga saxda ah subaxii.

Badbaadada amni ee basku waa muhiim, qof walbo, oo uu ay ku jiraan darawalada, ardayda, iyo qoysaska, waxa uu leeyahay door uu ka ciyaarayo amniga baska.

Waxaa suurta gal ah in uusan baska soo qaadi karin ilmahaaga markee cimiladu xun tahay. Waxaa lagaaga baahan karaa in aad u diyaar garowdo in aad adiga geyso waqti danbe, kasoo qaado waqti hore, ama aad guriga ku heyso maalmahaas oo dhan. Waxaad la hubsataa iskuulka si aad go'aanka ama waxa ugu haboon u sameyso.

# Imaanshaha iskuulka iyo soo daahida

## Iskuulka-hoose-kahore

Barnaamijka fasallada kahoreya dugsi hoose waa mid iskaa ah, laakiin waxaan ku dhiira gelina caruurta in ay imaadan maalin walbo. Ka qeyb qaadashada joogtada ah waxa ay ka caawineysa in ay la qabsadaan jadwalka, saaxiibo sameystaan, bartaan xirfadaha ay u baahan yihiin ee ugudbida iskuulka.

## Dhamaan fasalada

- Dhamaan ardayda fasalada dugsi hoose ilaa fasalka 12 waa in ay yimadaan iskuulka maalin walbo ilamaha uu xanuunsan yahay, leeyahay balan caafimaad, ama uu heysto fasaxaaga. Waxaa ardayda looga baahan yahay in ay waqtiga ku yimadaan maalin walbo.
- Waxaad ka hubsataa iskuulkaaga habraaca soo wargelinta maqnaanshaha iyo soo daahitaanka.
- Haddii ilmahaagu waqti badan ka maqnaan doono iskuulka, waxaad u sheegta macalinka sida ugu dhaqsiyaha badan.
- Si aad u shaqeysato dhibcaha koorso dugsi sare, ardayga waxaa laga filaya in uu joogo ugu yaraan 80% waqtiga fasallada dhamaan. Eeg *Siyaasada Latacamulka iyo Imaanshaha Ardayga* waxii warbixin dheraad ah.

# Cunada iskuulka

## Barnaamijka quraacda

Caruurta maalintooda ku bilaawdo quraac ayaa si wanaagsan ugu diyaarsan in ay ka qeyb qataan misna wax kabartaan iskuulka.
Barnaamijka quraacda waxaa heli karo dhamaan ardayda waana bilaash, wax diwaan gelin ahna looma baahno. Fadlan hubso iskuulkaaga si aad wax uuga barato waxa laga heli karo.

### Cunada fudud

**Iskuulka-hoose-kahore:** Caruurta dhigata iskuulka-hoose-kahore waxa ay helayaan labo jeer cuno fudud oo nafaqo leh.

**Fasallada hoose ilaa 12:** Dhamaan ardayda waxa ay soo qaadan karaan cuno fudud, marka lagu daro qadadooda, si ay u cunaan marka ku haboon.

### Qado

Qado nafaqo leh ayaa la siiya ardayda dhigata iskuulada dowlada ee dahmaan gobolka Nova Scotia. Barnaamijkan waxaa la siiya ardayda fasallada hoose, dhexe, iyo dugsi sare.

**Waxii warbixin dheraad ah:** Booqo Boga Barnaamijka Qadada Iskuulada Nova Scotia.

### Kasoo qaadashada cuno guriga

- Haddii cunugaagu kasoo qaadanayo raashin guriga, waxaad hubsataa in ay amaan tahay in herkulka caadiga lagu cuni karo ama isticmaal bacaha barafka si raashinka ugu keydiso.
- Boorsada qadada waa in uu ku qoran yahay magaca ilmahaaga.

**Ogoow:** Ardayda dhigata fasallada hoose ilaa 12 waxaa lagu dhiiro galinaya in ay dhallo biyo ah oo ay dib u buuxsan karaan soo qaatan si ay maalinta dhan iskaga isticmaalan.

### Raashin iyo waxaha kale ee alarjiga leh

- Haddii cunugaaga elarji qabo, u sheeg iskuulka markaa diwaan galineyso.

## Iskuulada fajignaanta-urka

Dadka qaar ayaa alarji ku qabo urta kala duwan ee walxaha iyo kimikaaliska kosmetikiska (barfuunka, make ubka, shaambada, diyodarantiga, iwm). Inta badan iskuulada malahan wax ur ah. Tani micnaheedu waa in iskuulka usheego ardayda iyo shaqaallaha in aysan isticmaalin wax ur leh inta aysan iskuulka imaanin kahor. Waxaad u raadisaa agab aan wax ur ah laheyn qoyskaaga kuna dhiiro geli ilmahaaga in uusan isticmaalin agabka urta leh kahor inta uusan iskuulka imaanin.

## U labisashada iskuulka iyo cimilada

Dhamaan ardayda waxaa ay waqti ku qaadan doonan banaanka maalinta iskuulka jiro. Tani waxa ay noqon kartaa inta uusan iskuulka bilaaban, markuu dhamaado, ama inta lagu jiro bareega, qadada, ama waqtiga ciyaarta. Haddii ay cimiladu xun tahay, iskuulka waxa uu go'aansan karaa in uu ardayda ku hayo gudaha maalintaas oo dhan.

Waxaad hubsataa in ilmahaagu u labisan yahay sida ku haboon ee cimilada:

- Xagaaga samarka, ilmahaaga waxuu u baahan karaa koofida qoraxda iyo kareenka qoraxda laga marsado
- Kaliya maalmaha roobka jiro, ilmahaaga waxuu u baahan karaa kabaha buudka roobka iyo jaakada roobka ee biyaha celiso.
- Xiliga barafka, ilmahaaga waxuu u baahan karaa jaakad diiran, buud, galoofiska gacmaha, iyo koofi.
- Iskuulka ilmahaaga ayaa sidoo kale ka rabi karo ilmahaaga in uu heysto kabaha "gudaha" oo uu isku badalo.

**Iskuulka-hoose-kahore:** Caruurta iskuulka-hoose-kahore ayaa 40% waqtiga maalintii banaanka ku qaato. Waxa ay u bixi donaan xaalado cimiloyin kala duwan, sidoo kale waa ay is qoyn donaan, waa ay is wasaqeynayaan marke biyaha, dhiiqada, carada, caleemaha iyo barafka ku ciyaarayan, Fadlan lasoo dir dhar dheraad ah ilmahaaga maalin walbo si ay iskugu badali karaan, haddii loo baahdo. Haddii macalinka caruurta yaryar (ECE) ee iskuulka-hoose-kahore ayaa kuu sheegi doono dharka ilmahaagu u baahan doono.

- "Muddy Buddies" ayaa suurta gal ah in laga heli karo iskuulkaaga. Kuwaan waa suud isku xiran oo ilaalinaya dharka ilmahaaga xiran yahay. ECE-gaaga ayaa kuu sheegi doono haddii Muddy Buddies loo heli karo ilmahaaga.

## Caafimaadka iyo badbaadada

Haddii cunugaagu xanuunsado ama dhaawacmo inta uu joogo iskuulka, shaqaallaha iskuulka ayaa kaaso wici doono taleefan nambarka aad siisay ee arrimaha degdega. Haddii uusan iskuulku ku heli karin, waxa ay la xiriiri doonaan xigtada labaad ee arrimaha degdega:ee aad ku qortay foomka diwaan gelinta. Haddii xanuunku ama dhaawacu halis yahay, iskuulka ayaa wici doono 911, shaqaallaha iskuulka ayaana u raaci doono ilmahaaga isbitaalka.

**Xaaladaha caafimaad horey u jiro:** Marka aad diwaan gelineyso ilmahaaga, fadlan ogeysii iskuulka xaaladaha caafimaad haddii ay jiraan. Tani waxa ay caawin doonta iskuulka inuu ku xiro Kalkaalisada Caafimaadka Iskuulka, oo kula shaqeyn doonto adiga, cunugaaga, iyo adeeg bixiyayaasha caafimaad si go'aan looga gaaro qorshaha xanaano iskuulka ee ilmahaaga. Adeegyada tujubaan ee luuqadaha ayaa la heli kara haddii loo baahan yahay.

**Taleefan nambarka:** Wareegtada Gobolka ee Isticmaalka Taleefanka Gacanta ee Iskuulada waxaa loo sameyay si loogu taagero waxbarashada ardayda, badbaadadooda, amnigooda, iyo isdhexgalka wanaagsan. Waxii warbixin dheraad ah oo isticmaalka taleefanka gacanta waqtiga iskuulka, eeg Wareegtada Gobolka ee Isticmaalka Taleefanka Gacanta ee Iskuulada boggen internetka.

## Dib-baxa iskuulka ama safarada fiilka

Dibad baxa iskuulka ama safarada fiilka waa qeyb muhiim ah oo ka mid ah barnaamijka iskuulka. Macalimiinta ayaa u diyaarin karo ardayda in ay soo boqdaan madxafka, tiyaatarka, ama goobo kale. Waxaad u baahan doonta in aad siiso iskuulka fasax ogolaansho qoraal ah si ilmahaaga safaradan loogu qaado. Ilmahaaga ayaa guriga la imaan doono  foomka fasaxa si uu u saxiixo iyo misna dib ugu soo celiyo macalinka dibad baxa iskuulka kahor ama safarka fiildiga.

## Agabka iskuulka

**Iskuulka-hoose-kahore:** Caruurta dhigato iskuulka-hoose-kahore ayaa la siin doona dhamaan agabka iskuulka u baahan yihiin.

**Fasallada hoose ilaa 12:** Waxa ay u baahan doonan in ay la yimaadan agabkooda iskuulka maalin walbo. Agabkan waxaa kamida ah qalin qoriga, tirtiraha, warqada, iwm. Iskuulka ayaa inta badan agabka kale siin doona iyo walxaha, sida buugaaga iyo tiknoolajiyada.

Iskuulka ilmahaaga ayaa soo bandhigi doono liiska agabka aad u baahan doonto in aad usoo iibiso inta uusan iskuulka bilaaban kahore Sebtembar.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo soo iibinta agabka iskuulka, fadlan soo ogeysii iskuulka ama lasoo xiriir SchoolsPlus, YMCA Barnaamijka Deginta Iskuulka ama YREACH, ama Immigration Francophone (eeg qeybta ugu danbeyso).

**Maktabada:** Inta badan iskuulada waxa ay leeyihiin Maktabad. Ilmahaaga waxuu kasoo amaahan karaa buugaag maktabada si uu ugu aqristo si bilaash ah si uu guriga ugu soo qaato. Waa in lasoo celiyo.

## Waxaha shaqsi ahaan loo leeyahay

Ilmahaaga waxuu masuul ka yahay waxiisa shaqsiga u leeyahay inta uu iskuulka joogo. Iskuulada qaar waxa ay leeyihiin sanduuqayada lookarada halkaas oo uu ilmahaagu ku keydsan karo waxiisa si amaan ah. Waxaa aad u wanaagsan in aad waxwalbo oo uu leeyahay ilmahaaga magaciisa ugu qorto.

Ilmahaagu waa in uusan keenin lacag faro badan iskuulka ama waxyaabo kale oo qaali ah. Iskuulka masuul kama ahan waxyaabaha dhuma, halaabo, ama la xado.

Inta badan iskuulada waxa ay leeyihin goob waxa Dhuma oo Lahelay. Haddii ilmahaagu uu ka dhimo wax shaqi u leeyahay, waxaa suurto gal ah in ay ka heli karaa qeybta waxa Dhuma oo Lahelay.

## Bogga Waalidka-Ardayga

Xogta ardayda waxaa lagu maareya nidaam elektaronig ah loona yaqaan PowerSchool, halkaan oo ardayga iyo waalidku/masuulka ka arki karaan si isla markiiba ah xogta, sida fasalka jadwalkiisa, leyliyada, gareedka, imaanshaha, faalloyinka macalinka, iyo ogeysiisyada kala duwan ee iskuulka. Si aad u isticmaasho bogga, weydii shaqaallaha xaafiiska iskuulka ciwaan iyo nambar sireed gaar ah kadibna booqo: www.ednet.ns.ca/inschool/students_parents.

## GNSPES iyo Google Workspace ee Waxbarashada

Ardayda ayaa la siin doona GNSPES ama SEPNE (ee iskuullada CSAP ) akoon leh ciwaan iyo nambar sireed. Akoonka waxaa laga heli karaa waxyaabo badan oo waxbarasho digital ah iyo agab kale oo uu ansaxiyay nidaamka waxbarashada iskuulada dowlada Nova Scotia.

Ardyada iyo macalimiinta ayaa sidoo kael isticmaali kara Google Workspace ee Waxbarashada si ay u sameyaan, u keydiyaan, ama iskula wadagaan dukumiintiyada, iyo in ay kuwad xiriiraan.

Si looga taageero ciwaanadooda GNSPES ama isticmaalka agabka digitalka ah, ardayda waxa ay weydiin karaan macalinka fasalkooda ama English sidii luuqaad dheerad ah (EAL) ama macalinka French sidii luuqad dheeraad ah (FAL) caawinaad.

## Rugta Leyliga-Guriga

Rugta Leyliga-Guriga Nova Scotia waa labo luuqadle (English iyo Fransiis) nidaam onleyn ah ee ardayda dhigata fasalada 4 ilaa 12 waxa uuna siiya agab ka caawinaya horumarinta fahankooda xisaabeed oo uu ku jiro:

- casharo muuqal ah
- su'aallo tijaabin ah oo leh jawaab celin degdeg ah
- buugaagta xisaabta oo digtial ah ah
- kalkuleetarka xisaabta asaasiga, seyniska iyo xariiqa garaafka
- Kaararka xasuusta dijital ah oo erayada xisaabta
- casharo qaas ah, bilaash ah, oo bararashada xisaabta lagu ogaaneynin oo leh macalin ay ansaxisay Nova Scotia:
  - **Casharada qaaska onleynka**, ardadayda ayaa ku dhufsan kara calaamada Tutor-ka ee Rugta Leyliga-Guriga (Homework Hub).
    Casharada onleynka tutorka ma loo baahno kaamiro; ardayga iyo macalinka waxa ay is weydaarsanayaan warbixinta ayagoo isticmaalaya sabuurad digital ah.
  - **Tutorka qadka taleefanka**, ardaydu waxa ay wici karaan 1-888-444-6607.
    Ardaygu waa qasab in uu sheego ID nambarkiisa marka uu soo waco.

Ardayda waxa ay isticmaali karaan Rugta Leyliga-Guriga ayagoo soo galaya akoonkooda GNSPES kana sii dooranaya calaamada Rugta Leyliga-Guriga.

## Waxqabadyada dheeriga ah

Kuwaani waa waxqabadyo, sida isboortiska iyo kooxda fanka iskuulka, oo dhex howlgala iskuulka laakiin ka baxsan waqtiga xiisadaha fasalka. Waxaa laga yaaba in aad rabto in aad ku dhiiro geliso ilmahaaga in uu ku biiro waxqabadyada dheeriga ah, waxa ay ka caawin karaan ilmahaaga in uu horumariyo xirfadiisa Englishka/Faransiiska, saaxiibo cusub sameysto, iyo in uu la qabsado gurigiisa cusub ee gobolkan.

## SchoolsPlus

SchoolPlus waxa ay bixisaa barnaamijyo faro badan oo taagera ardayda, qoysaska, iyo iskuulada. Barnaamijyadan waxaa lagu bixiyaa wadashaqeyno kala duwan, oo isku keenayo adeegyo hal meel misna ka dhigayo iskuulka rug taageerta bulshada. Adeegyada laga bixiyo iskuul walbo waxa ay xushmeyaan misna haqabad tiraan baahi gaar ah oo ay qabto bulshadaas.

Barnaamijyada waxaa ka mid noqon karo:

- barnaamijyada waalidnimo iyo taageroyinka
- cayaaraha, bulshada iyo waxqabadyada farshaxanka
- xirfad wadaaga
- waxqabadyada dhaqamada
- barnaamij koxeedka loo nashqadeyay taagero (tusaalo, barnaamijyada dhalin-yarada gabdhaha iyo wilasha, murugada iyo barnaamijyada xadgudubka-gardaro)

## YMCA

Si aad u taagerto qoyskaga inuu la qabsado bulshada iskuulka cusub, adiga iyo cunugaaga waxaad ka qeyb qaadan kartaan barnaamijyada iskuulka sida YMCA.

YMCA Barnaamijka Dejinta Iskuulka waxaad ka heli kartaa Dowlada Hoose ee Deegaanka Halifax (HRM) iyo bulshooyinka ka baxsan HRM ee leh Barnaamijika YREACH .

Waxii warbixin dheeraad ah, eeg Barnaamijka Qofka Cusub bogga YMCA.

## Immigration Francophone

Immigration Francophone de la Nouvelle-Écosse (IFNÉ) waa hayad aan faa'ido doon aheyn ee Halifax taas oo bixisa adeegyada dejinta dadka ku cusub Francophone. Adeegyada waxaad heli kartaa inta aadan imaan kahore iyo markaa imaato kadib. IFNÉ's Dejinta Shaqaallaha Iskuulka ayaa ka caawiso qoysaska **guud ahaan gobolka** oo ah dadka sida joogtada u dagan oo caruurtoodu dhigato iskuulada CSAP. Adeegyada ayaa laga bixiyaa iskuulka

## Warbixinta goobta lagala-xiriirayo

Waxii warbixin dheraad ah, la xiriir Xarunta Waxbarashada Deegaankaga (RCE) ama Conseil scolaire acadien gobolka (CSAP).

- **Annapolis Valley Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (AVRCE)
- **Cape Breton-Victoria Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (CBVRCE)
- **Chignecto-Central Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (CCRCE)
- **Conseil scolaire acadien provincial** (CSAP)
- **Halifax Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (HRCE)
- **South Shore Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (SSRCE)
- **Strait Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (SRCE)
- **Tri-County Xarunta Waxbarashada Deegaanka** (TCRCE)
- **SchoolsPlus** isku keeneysa adeegyo kala duwan iyo taageroyin, waxaana ka heli kartaa iskuul walbo oo Nova Scotia

Waxii taagero bulshadaada ah, lasoo xiriir:

- **YMCA Dejinta Iskuulka** – laga heli karo guud ahaan-gobolka
- **YREACH** – laga heli karo dibada Halifax Dowlada Hoose ee Deegaanka (HRM)
- **Immigration Francophone** –laga heli karo Dejinta Shaqaallaha Iskuulka